# Israha iyo micraajka iyo aayadaha Alle waaweyn

Mahad Allaa iska leh, Allaha Caalamka oo kitaabkiisa Kariimka ku yiri:

**{سُبْحَانَ الَّذِي أَسْرَى بِعَبْدِهِ لَيْلًا مِنَ الْمَسْجِدِ الْحَرَامِ إِلَى الْمَسْجِدِ الْأَقْصَى الَّذِي بَارَكْنَا حَوْلَهُ لِنُرِيَهُ مِنْ آيَاتِنَا إِنَّهُ هُوَ السَّمِيعُ الْبَصِيرُ}**

**(waxa Nasahan (Ceeb ka fog) Eebaha ka guuriyay Addoonkiisa (Nabiga) Habeen masaajidka Xurmada leh (Maka) xagga Masjidkii Aqsa een barakaynay Gaararkiisa inaan Tusinno Nabiga Aayaadkanaga Eebana waa maqle arka)**

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame

Intaas kaddib:

Socdaalka israha iyo micraajka waa mucjiso weyn oo tusinaysa meeshay la eg tahay awoodda Alle aan xadka lahayn, Alle (SW) waa kan abuura sababaha iyo waxa ka dhasha, wax dadka agtooda yaab ka ah Alle (caza wa jalla) agtiisa yaab kama ah,

**{إِنَّمَا أَمْرُهُ إِذَا أَرَادَ شَيْئًا أَنْ يَقُولَ لَهُ كُنْ فَيَكُونُ}**

**(Amarka Eebena markuu wax inuu abuuro doono waa inuu ku yidhaahdo uun ahaw oo uu ahaado).**

Alle (caza wa jalla) wuxuu ku xoojiyay socdaalkan barakaysan qofkuu jeclaa oo la doortay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaate), wuxuu ka kaxeeyay caalamka dhulka wuxuu u kaxeeyay

caalamka cirka wuxuu geeyay sidrat almuntahaa, siduu u tusiyo aayadahiisa waaweyn iyo cajaa’ibta awooddiisa ballaaran.

Aayadan waaweyn waxaa ka mid ah kuwo aan ogaanay, iyo kuwo aanan ogaanin, wuxuu ka dheelmiyay nabigiisa (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) masjidka xaramka wuxuu u dheelmiyay masjidka al-aqsaa, kaddib wuxuu u qaaday samadaha sarreeya, kadib masjidka al-aqsaa iyo masjidka xaramka mar kale hal habeen kaliya; waa awoodda Ilaahay oo aan xadka lahayn awood kalana ma jirto iyada aan ahayn.

Wuxuu ku arkay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) malakuudka samadaha layaabka awoodda Alle (SW) wuxuu leeyahay Alle :

**{سَنُرِيهِمْ آيَاتِنَا فِي الآفَاقِ وفِي أَنْفُسِهِمْ حَتَّى يَتَبَيَّنَ لَهُمْ أَنَّهُ الحَقُّ}.**

**(Waxaanu ku tusin aayaadkanaga jahooyinka iyo Naftooda intey uga caddaato inuu Quraanku xaq yahay, miyuuna ku filleyn inuu wax kaste ogyahay)**

Aayadahan waaweyn waxaa ka mid ah: sahlitaanka uu u sahlay Alle (caza wa jalla) rasuulkeena (nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) buraaqa, wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(أُتيتُ بالبُراقِ، وهو دابَّةٌ أبيضُ طويلٌ، يضعُ حافرَه عند مُنتهَى طرْفِه)**

**(Waxaa lay keenay buraaq waa dabaad cad oo dheer qoobkiisa wuxuu dhigayaa meesha araggiisa ku dhamaado)**, middan waxaa ku sugan daliilyada tusiya awoodda Ilaahay, sidoo kale nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) baritaanka uu na barayay darsiga la imaanshaha sababaha, Alle (SW) wuu awooday inuu dheelmiyo wax la’aan.

Waxaa ka mid ah: kulanka uu la kulmay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) anbiyada iyo rususha, awoodda

Alle uu u leeyahay noolaynta ayaa meesha kasoo muuqatay, wuxuu u soo nooleeyay nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu ku dujiyay masjidka Al-aqsaa, kuwana wuxuu kula kulmay samada sare dhamaan way soo dhaweeyeen, khayrna way ugu duceeyeen, taasna waa oofinta ballantooda ay Alle (SW) la galeen oo ku sugan oraahda Alla sarreeya:

**{وَإِذْ أَخَذَ اللَّهُ مِيثَاقَ النَّبِيِّينَ لَمَا آتَيْتُكُمْ مِنْ كِتَابٍ وَحِكْمَةٍ ثُمَّ جَاءَكُمْ رَسُولٌ مُصَدِّقٌ لِمَا مَعَكُمْ لَتُؤْمِنُنَّ بِهِ وَلَتَنْصُرُنَّهُ قَالَ أَأَقْرَرْتُمْ وَأَخَذْتُمْ عَلَى ذَلِكُمْ إِصْرِي قَالُوا أَقْرَرْنَا قَالَ فَاشْهَدُوا وَأَنَا مَعَكُمْ مِنَ الشَّاهِدِينَ}.**

**((Xusuuso) markuu ka qaaday Eebe Ballan adag Nabiyada waxaan idinsiiyo oo Kitaab iyo Xigmo ah markaas idiin yimaado Rasuul rumeyn waxaad haysataan waa inaad rumeysaan una gargaartaan, kuna yidhi (Eebe) Ma qirteen oo ma qaadeen Arrintaas Ballankeyga ah oo dheheen waan qirnay (ogolaanay) markaas ku yidhi Marag ka noqda Anna la jirkiina yaan ka mid noqon kuwa marag kici.)**

Waxaa ka mid ah: aragtida uu arkay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) beytulmacmuurka ee ku yaalla samada, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(فإذا أنا بإبراهيمَ مُسنِدًا ظهرَه إلى البيتِ المعمورِ، وَإِذَا هُوَ يَدْخُلُهُ كُلَّ يَوْمٍ سَبْعُونَ أَلْفَ ملَكٍ، لا يَعُودُونَ إِلَيْهِ)،**

**(Ibraahiim ayaa dhabarkiisa ku tiirsanaa beytulmacmuurka, maalin kaste waxaa soo gala toddobaatan kun malag mana kusoo laabtaan)**, Alle (caza wa jalla) beytulmacmuurka ayuu ugu dhaartay quraanka sharaftiisa iyo weynidiisa awgeed, wuxuu leeyahay Alle (SW):

{وَالبَيْتِ المَعْمُورِ}

**(Iyo gurigii cammirraa (beytulmacmuur)**

Waxaa ka mid ah: gaaritaanka uu gaaray nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) sidrtu almuntahaa, waana karaamaynta Allaha sarreeya uu karaameeyay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah:

**{مَا كَذَبَ الْفُؤَادُ مَا رَأَى * أَفَتُمَارُونَهُ عَلَى مَا يَرَى * وَلَقَدْ رَآهُ نَزْلَةً أُخْرَى * عِنْدَ سِدْرَةِ الْمُنْتَهَى * عِنْدَهَا جَنَّةُ الْمَأْوَى * إِذْ يَغْشَى السِّدْرَةَ مَا يَغْشَى}.**

**(Qalbiguna Ma beeniyo wuxuu arkay (Nabigu) * Ee ma idinkaa ka murmi «kana doodi» wuxuu arkay * Dhabnimuu Nabigu u arkay Jibrill mar kale * Sidratul-Muntaha agteeda * Agteedana waxaa ah Jannatul-ma'waa * (Wuxuu arkay) waqtiguu daboolayay Sidrada wax daboola.)**

****

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato kan lagu khatimay nebiyada iyo rasuullada, sayidkeenna Muxammad (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), iyo dhammaan ehelkiisa iyo asxaabtiisa.

Socdaalka israha iyo micraajka wuxuu ahaa karaamayn xagga Alle ka timid oo lagu karaameynayo nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) markuu la kulmay kadib dhibaato iyo rafaad, taas waxay ahayd nafis oo kurbada ka

qaadaysa oo qalbiga sugaysa naftana dejinaysa, wuxuu leeyahay Alle (SW):

{فَإِنَّ مَعَ العُسْرِ يُسْرًا * إِنَّ مَعَ العُسْرِ يُسْرًا}.

**(Cidhiidhina waxaa ku dhaw fudayd (faraj) * Cidhiidhina waxaa ku dhaw fudayd)**

Alle (caza wa jalla) wuxuu tusiyay nabigiisa xaqiiqooyin naga maqan iyo asraar koonka la xiriira, asoo ogeysiinaya nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) in Alle (caza wa jalla) uu la jjiro iyo inuu dhowrayo uu xifdinayo, maxaa ka fiican Al-imaam Albuusiiri  markuu yiri:

**سريتَ من حرمٍ ليلاً إلى حرمٍ * كما سرى البدرُ في داجٍ من الظُّلَمِ**
**وَبِتَّ تَرْقَى إلَى أَنْ نِلْتَ مَنْزِلَةً * من قابِ قوسينِ لم تدركْ ولم ترمِ**
**وقدَّمتكَ جميعُ الأنبياءِ بها * والرُّسْلِ تَقْدِيمَ مَخْدُومٍ عَلَى خَدَمِ**

**Habeen baad xaram uga dheelmatay xaram**
**Siduu dayuxu habeen mugdi ugu socdo ***
**Waad sii fuulaysay ilaa aad darajo ka gaarto***
**Qaanso xadhiggeed aan la gaarin lana doonin**
**Dhamaan anbiyada way ku hormariyeen ***
**Iyo rususha sida looga hormariyo sayidka adeegaha**

**Ilaahayow nagu arsaaq adduunka si wacan inaan ugu dayano nabigaaga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), aakhirana shafaacadiisa)**